



## Waaxda Ka Hortagga Dabka

350 South 5th Street, Room 233, Minneapolis, MN 55415-1387  
(612) 673-3270 Fax (612) 673-2828

Waxaa ogoloday: Perry Ebner, Taliyaha Dabdamiksa  
(612) 673-3270 La Qoray: Juun, 2013



## DABKA LAGU MADADAASHO

### Qeexitaanada

**Dabka La Shido** Waxyaabo dab dhaliya oo loo isticmaalo dabaaldeg farxadeed, diineed, xaflad, cunto karin, isku diirin ama ujeedo la mid ah

**Waxyaabaha La Ogol Yahay:** Waxyaabaha loo adeegsan karo waxaa ka mid alwaax aan wax kiimiko ah la marin ama lagu qoynin waxyaabo kale.

**178.20. Sharciyada Lagu Maamulo:** Qof kasta oo bilaabaya, qabanaya ama marti galinya munaasabad dab loo shidayo waa inuu eegaa oo la socdaa una hogaansmaa sharciyada udegsan kuwaas oo lagu soo bandhigay mid ama laba ka mid ah Sharciyada Dabka ee Gobolka Minnesota.

- (1) Dabka la shido ujeedadada uu doono ha lahaadee dhumucdiisu kama weynaan karto (3) dhudhun iyo (2) dhudhun oo dherer ah .
- (2) Meesha dabka laga shido waa in ay dhismayaasha iyo guryaha u jirtaa shan iyo labataan (25) dhudhun.
- (3) Waa in loo sameeyaa xeyndaab ku wareegsan oo ugu yaraan dhulka ka kacsan lix (6) inji oo dherer ah.
- (4) Waxyaabaha la ogol yahay oo kaliya ayaa loo isticmaali karaa in lagu huriyo dabka.
- (5) Goobta dabka laga shido waa inuu joogaa qof ay da'diisu ugu yaraan tahay sideed iyo toban sano jir (18) ama ka weyn oo dabka damin kara inta aanu faafin.
- (6) Waa in goobta la keenaa qalabka dabka lagu damiyo sida kan leh haanta la qaadi karo ee leh dhuunta dheer, ciid iyo badiil, caagado biyo ku jiraan iyo haanta dab damiska ee ugu yaraan darajadeedu tahay 4-A - si markiiba loogu isticmaali karo daminta dabka.
- (7) Dabka madadaalashada loo shito waxaa la shidi karaa oo kaliya inta u dhaxeysa 9:00 aroornimo ilaa 10:00 fiidnimo.
- (8) Dabka lagu madadaasho lama shidi karo haddii xawaaraha dabeyshu ka badan yahay 10 mile saacadiiba. ama xilliyada Hay'adda Ilaalinta Wasaqowga Hawada ee Minnesota ay soo saarto digniin ku saabsan wasaqowga hawada ee la xiriirta caafimaadka ee waxyaabaha hawada raaca (PM<sub>2.5</sub>) dhul ay ku jirto Magaalada Minneapolis. (2003-Or-143, § 1, 12-15-03; 2013-Or-047, § 1, 5-10-13)

**Joojinta (Daminta Dabka)** Taliyaha Dabdamiska, Taliyaha Ciidamada Nabadgelyada iyo cid kasta oo loo xil saaro kana tirsan waaxda dabdamiska, waaxda ka hortagga dabka, ama saraakiisha Boliiska ayaa amar ku bixin kara in si dhaqso ah loo damiyo dab kasta oo leh shuruudaha hoos ku xusan mid ka mid ah:

- (1) Abuuraya xaalad khatar ah ama nabadgelyo daro ah.
- (2) Ku aburi kara buuq iyo deganaan la'an dadka degan agagaarka goobta .
- (3) Ku xadgudbaya mid ama qeyb ka mid ah sharciyada halkan ku xusan.
- (4) Ku xadgudubka mid ka mid sharciyada shididda dabka ee Minnesota.

**Ciqaab (a)** Mid kasta oo ka mid ah ku xadgudubka sharciyadaas waa dambi yar, kaas oo ciqaabtiisa ugu badan ay noqon karto (\$80.00).

**(b)**Taliyaha Dabdamika, Taliyaha Ciidamada Nabadgelyada iyo cid kasta oo loo xil saaro kana tirsan waaxda dabdamiska, waaxda ka hortagga dabka, ama saraakiisha Boliiska ayaa u xil saaran fulinta shaciyadaan iyaga oo sharciga u adeegsanaya, taasoo ay ka mid tahay in qofka jabiyay sharcigaas la siiyo tigid.

**Adeegsiga** Sharciyadaan waxa ay gaar u yihiin oo kaliya shididda dabka oo ay ka mid yihiin dabka la isku diiriyo (ee kaligiis taagan),, laakiin ma khusseeyaan dabka hil,ibka lagu soosho, makiinadaha wax lagu dubo ama kuwa olola ee cuntada lagu karsado oo leh u sharcio u gaar ah ee Minnesota.

**Iska hor imaad.** Haddii ay dhacdo in sharciyadaan mid ka mid ah uu ka hor imanayo Sharciyada dabka la Shito ee Minnesota, xeerar ama sharcio kale, waxaa la dhaqan gelinayaa kan ugu adag dhamaantood.